## SUURAT AL-ACLAA:

*Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.*

1. *Waynee Magaca Eebe ee Sarreeya*
2. *Eebaha abuuray khalqiga ekeeyayna*
3. *Eebaha wax walba qaddaray jidkana tusiyey*
4. *Eebaha soo bixiya daaqa*
5. *Kana dhiga markaas ka dib caws ingagagan oo madow*
6. *Waxaan kuu akhriyaynaa Quraanka halmaaminamaysid*
7. *Wuxuu Eebe doono mooyee, Eebana waa ogyahay waxa muuqda iyo waxa qarsoonba*
8. *Waxaana kuu fududaynhaynaa waddo fiican*
9. *Ee wax waani ( Nabiyow ) markay wax tari waanadu*
10. *Waxaa waantoobi ruuxa Eebe ka yaabee*
11. *Waxaana ka fogaan waanada ruuxa xun*
12. *Ee ah mid gali Naar wayn*
13. *Oon kuna dhimanayn dhexdeeda kuna noolaanayn*
14. *Waxaana liibaanay ruuxii daahir noqda*
15. *magaca Eebana xusa, salaaddana tukada*
16. *Saas ma aha ee dadku wuxuu doortay nolosha adduunyo ee dhaw*
17. *Aakhiraase khayr badan baaqina ah ( hadhi )*
18. *Arrintaasuna waxay ku sugantahay Kutubtii hore*

### *19. Kutubtii ( Nabi ) Ibraahim iyo ( Nabi ) Muuse.*

Qur’an 87: 1-19

**Sharaxda Suurrada:**
Eebe sharaf badan, Magaciisuna sidoo kale waa sharaf badanyahay, wax walbana isagaa qadaray, jidkana isagaa kala cadeeyay, ruuxii fiicanna tan san buu qaadi, ruuxii xunna tan daran buu qaadi, wuxuuna ku noolaan ma disho ma noolayso. Liibaan waxaa leh ruxii mu’min noqda xuska Eebe iyo salaaddiisana badiya, nolosha adduunyana ayna khaldin, ileen Aakharaa fiicane, waxaa la soo sheegayna waxay ku sugnayd kutubihii hore, sida: kii Nabi Ibraahim iyo Nabi Muuse.
Saxiixu Muslim waxaa ku sugnaaday: Eebe wuxuu qaddaray maamulka khalqiga abuuridda samaawaadka iyo dhulka ka hore konton kun oo sano, Carshigiisuna wuxuu ahaa Biyaha korkooda.